

XIRMADA AKHBAARAH

Sidee ubadkayga ugu magacaabaa imtixaanka Waxbarashada Sare? Waxaa magacaabi karo imtixaanka waalidka, macalimiinta/shaqaalaha iyo xubnaha ururada, laakiin **waxaa loo baahan yahay** saxiixa foomka *Ogolaashaha Fasaxa Waalidka* ee imtixaanka. *Macalinka iyo xubnaha ururada waxuu siinayaa* waalidka foomka Ogolaashaha Fasaxa Waalidka ardayga ay soo magacaabeen. Foomka **Talo** Siinta Macalinka/Aqoonyahanada waa loo baahan yahay. Labada foom waxaa ugu dambeeyo Oktoobar 9, 2008*. (*Ardayga dhiganaayo Waxbarashada Dhalaanka kaliyah, Foomka Talo Siinta Macalinka/Aqoonyahanada ugu damdeeynta Nofeembar 12, 2009 iyo faamka waalidka Oktoobar 8, 2009).

Xaggee aan ka helayaa foomankaas? Waxaa ka helayaa ashyaada u magacaabida xafiiska dugsiyada hoose iyo dugsiyada dhexe, Bilingual Family Center, iyo Enrollment Centers goobta John Stanford Center for Educational Excellence. Ashyaadaas waxaa kalo ka helayaa shabakadaan: www.seattleschools.org/area/advlearning/index.xml

Goobtee loo celinayaa ashyaada magacaabida? Waxaa u soo celinaysaa ashyaada u magacaabidaada xooghaynta dugsiyada ee Dugsiyada Dadweynaha dugsiyada hoose iyo Dhexe ama u soo diray si toos ah adareeska kor ku qoran ee Waxbarashada Sare. Ha' seen foomka macalinka Ogolaashaha Waalidka. Macalimiinta waxay soo celinayaa foomka talo siinta Macalinka/Aqoonyahanka xooghaynta dugsiyada ama boostada dhismaha ama US boostada. foomka magacaabida waxaa gacanta ku keeni kartaa Goobta Xarunta of the Stanford Center, 2445 Third Ave. S. lama ogolo fakiska ama e-malka *Qoysaska dugsiyada gaarka ah waxay u dirayaa ashyaada Waxbarashada Sare iyadoo soo raacsinayaa lacag dhan \$90.*

Haddii aan ku noolahay xuduud ka baxsan Degmada Dugsiga Seattle, ubadkayga miyaa magacaabi karaa in oo galo imtixaanka? Maya. Ardayda waa in ay ku nool yihiin xuduuda degmada si imtixaanka u galo ama hadda oo ka diiwaangalsan yahay Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

Miyaa la iiso ogeysiinayaa taariikhda imtixaanka ubadkayga? Haa taariikhda imtixaanka balanza warqada waa lagu siinayaa. Waalidka/wakiilada aanan helin taariikhda imtixaanka balanza warqada waa in ay la soo xariiraan Xafiiska Waxbarashada Sare. Imtixaanka wuxuu bilaawanayaa dhamaadka Oktoobar ilaa desda Diseembar. Imtixaankagaaritaanka aqoonta waxaa la dhameeynayaa dhaxda Janaayo 2010. Dugsiyada qaarkood imtixaanka waxaa laga qaadayaa Sabtiyada.

Goormaa la imtixaanayaa ardayda dugsiyada gaarka ah? Ardayda hadda aanan digan Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa la imtixaanayaa Sabtiyada. Imtixaanka waxaa lagu qaadayaa goobo kala duwan dugsiyada hoose ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle. Warqada imtixaanka balanka oo leh taariikhda iyo goobta waxaa la soo dirayaa inta ka dib Oktoobar 8 ugu dambeeynta. Ardayda qaar ka mid ah waxaa loo baahan yahay in labo Sabti imtixaanka ay galaano, waxayna ku xiran tahay Imtixaanka agrazada aqoonta.

Waalidka miyee fiirin karaa goorta ubadkooda imtixaanka laga qaadaayo? Maya. Way dhibaysaa ubadka qaadista imtixaanka. Ubadka wuxuu aad ugu fiican yahay goorta waalidkood daawaneeynin.

Goormaa helayaa natijada imtixaanka ubadkayga? Natijada xaq u yeelashada ugu dambeeyso waxaa lagu soo dirayaa Janaayo 29, 2010. Natijada imtixaanka iyo xaq u yeelashada malagu soo warbixinaayo horay ama taleefoon ama e-maylka, ama fakiska.

UGU DAMBEEYNTA FOOMKA U MAGACAABIDA WAA OKTOOBAR 8, 2009



Waa maxay nooca imtixaanka la qaadaayo? Ardayda oo dhan way qaadanaayaa imtixaanka si loo qiyaaso awooda garashada aqoonta (*Imtixaanka Garashada Awooda Aqoonta*). Intaa waxaa dheeraad ah oo loo baahan yahay imtixaanka aqoon gaarida akhriska iyo xisaabta. Waxana la isicmaali doonaa natiijada imtixaanka aqoon gaarida imtixaanka WASL (Xiliga Gu'ga 2009) ama MAP (*Measures of Academic Progress, si cusub u hirgalaayo maamulka degmada lagana bilaawaayo Xiliga Dayrta 2009*). Ardayda aanan laheeyn diiwaanka imtixaanka aqoonta akhriska iyo xisaabta waxaa la siinayaa imtixaanka *Woodcock-Johnson Achievement Test* (fasalada k-1), the *Iowa Test of Basic Skills* (fasalada 2-7), ama MAP. Xaq u yeelashada barnaamijka Spectrum Young Scholars program (fasalda 1-2) ma looga baahno imtixaanka aqoon gaarida. Fadlan fiiri goobta shabakada “website: www.seattleschools.org/area/advlearning/eligtestcriteria.htm fasiraad dheeraad ah.

Gaaritanka imtixaanka akhriska iyo xisaabta miyaa la tixgalinayaa? Ardayda hada aan ku qorneeyn Dugsiga Dadweynaha Seattle qaatayna heerka imtixaanka gaaritaanka akhriska iyo xisaabta dugsiga kana horeeynin Maarso 1, 2009 waxay keeni karaan warbixinta dhibcaha. Warbixinta dhibcaha waa in la keenaa Xafiiska Waxbarashada Sare Diseembar 16, 2009. Waxaana la tixgalinayaa dhibcaha qaranka imtixaanada (tusaale, ITBS, ERB) ama dhibcaha warbixinta WASL oo ka baxsan Dugsiga Dadweynaha Seattle. Keenida dhibcaha waa qayb ka mid ah warbixinta dhibcaha ardayga, mana loo isticmaalaayo *Awooda Aqoonta Imtixaanka*.

Miyuu jiraa habka rafcaanka go'aanka ardayga aan xaq u yeelan? Haa. Akhbaaro gaar ah oo quseeyo habka rafcaanka ayaa la socdo warqada xaq u yeelashada iyo waxaana laguugu diyaariyey Goobta Shabakada Waxbarashada Sare. Si gaar ah waxaa loo qiimaynayaa oo kaliya xiliga habka rafcaanka.

Ardayga miyuu xaq u leeyahay in oo dib-loo imtixaano? Haddii ardayga oo dhiganaayo Accelerated Progress Program (APP), in a Spectrum Program, ama an Advanced Learning Opportunity (ALO) dugsiga, waxaa la siinayaa warbixinta horumarinta ardayda Waxbarashada sare, mano u baahno in oo dib loogu imtixaano xaq u yeelashada, Waxaana ka mid ah ardayda ah fasalada 5th ilaa 6th. **Ardayda xaq u yeelan barnaamijka xiliga imtixaanka wareega imtixaanka 2009-2010 ardayda aanan ku qorneen barnaamijka waxay u baahan yihiin dib-u-qaataan xiliga soo socdo wareega imtixaanka 2010 - 11.** Ardayga codsaday barnaamijka laakiin lagu qoray liiska sugitaanka, waxaana la siinayaa waqti fidinta laakiin waa in aad dhamaadka diiwaangalinta sanadka soo socdo ama dib-imtixaan qaadida.

Xaq miyeey u leeyihiin ardayda fasalka 8th? Maya, xaq u yeelashada imtixaanka uma baahno galitaanka barnaamijka International Baccalaureate (oo laga bixiyo dugsiyada sare Sealth iyo Ingraham)

Ubadkayga hadda oo dhigto dugsiyada gaarka ah: Maxaan u isticmaalaayo nambarka aqoonsiga ardyada? Haddii aad codsatay horay weligaa diiwaangalinta ubadkaada Dugsiga Dadweynaha Seattle, ama horay u codsatay galitaanka imtixaanka, ubadkaada wuxuu leeyahay nambarka ID. Qoysaska dugsiyada gaarka ah oonan garaneyn, ama aanan haysan nambarka ID, waa in aad baneysaa goobtaan. Ha isticmaalin social security numbers.

Waa maxay sababaha loogu codsaday foomka u magacaabida qoomiyadaha? Jinsiya waxaa looga baahan yahay ku qoritaanka # ID Dugsiga Dadweynaha Seattle, waxaana muhiim ah dhamaan ardayda hada dhigata Dugsiga dadweynaha Seattle uusan haysan weli # ID.* *Haddi ubadkaada ku qorneeyn Dugsiga Dadweynaha Seattle, uusan la heeyn # ID Dugsiga Dadweynaha Seattle. Fadlan dooro kuwa soo socdo: AI: Amer Indian; AN Alaskan Native; BL Black; CH Chinese; EI East Indian; FI Filipino; GY Gypsy; HA Hisp Asian or Pac Islander; HB Hisp Black; HI Hisp Indian; HW Hisp White; JN Japanese; KO Korean; NA Native Amer or other Alaskan Native; OA Other Asian or Pac Islander; SA Samoan; SO Southeast Asian; VI Vietnamese; WH White

Fadlan fiiri goobta shabakada akhbaaraha dheeraadka ah
<http://www.seattleschools.org/area/advlearning/index.xml>

Waa maxay barnaamijka Waxbarashada Sare iyo howlahiida? Barnaamijka waxbarashada sare wuxuu bixiyaa macluumaadka manhaj sare si ay ula kulmaan baahida waxbarashada ardayda leh haybada aqoonta sare. Waxbarashada sare wuxuu ka yimaadaan qoomiyado dhaqano, luqadaha, daqliga bulshada kala duwan, lehna awood dhaqan kala jaad ah gaaritaanka aqoonta. Waxayna u baahan yihiim habab iyo barnaamijyo, u adeega cimiladaa waa mid lagu dhiiragalinaayo. Xafiiska Waxbarashada Sare wuxuu xariirinayaa barnaamijyada waxbarashada sare, xaq u yeelashada imtixaankakala qaadida iyo ku qorida ardayda kuleejada/imtixaanada sare.

Barnaamijka	Fasalad a la shaqayo	Imtixaan ka Xaq u yeekashada	Manhajka
Fursada Waxbarashada sare (ALO)	1-8	Looma baahno	Manhajka qaniga ah oo xooliga sare leh ee akhriska iyo xisaabta
Deeqda Haybada Waxbarashada Dhalinyarada	1-2	HAA	Manhajka xooliga sare ee akhriska iyo xisaabaadka (nooca ka sareeyo hal sano fasalka heerk ku qoran yahay)
Waxbarashada Haybada Dhexe	3-8	HAA	Manhajka xooliga sare ee akhriska iyo xisaabaadka (nooca ka sareeyo hal sano fasalka heerk ku qoran yahay)
Barnaamijka Horumarinta Xooliga Sare (APP)	1-8	HAA	Manhajka xooliga sare ee akhriska iyo xisaabaadka iyadoo sal-dhig looga dhigay baahida ardayga (nooca ka sareeyo labo sano fasalka heerk ku qoran yahay)
Caalamiga Baccalaureate	9-12*	Loogama baahno	Manhaj taxadir ah dugsiga sare iyadoo sal-dhig looga dhigay hoeumarinta caalamiga iyo barnaamijka muraajacada manhajka
Ku Qoritaanka Waxbarashada Sare	9-12*	Loogama baahno	Manhaj taxadir ah dugsiga sare u hogaaminaayo ururinta dhibcaha koleejadaha iyo maamulka ku qoritaanka imtixaanka waxbarashada sare ee ardayda dugsiyada sare.

*Xaq u yeelashada imtixaanka ma looga baahno ogolaashaha barnaamijyada dugsiga sare iyo imtixaanada loo diyaarin fasalka 8th.

Ma u magaacaabi karaa aniga ubadkayga in laga qaado hal ka mid ah imtixaanka barnaamijka? Halkaa waxaa ka helayaa qodoba aad tixgalinaysid goorta aad u magacaabeysid.

- Xirfada ficilka**
 - ✓ Ma ka sareeysaa agoonta xarfaha cusub da'diida ama da;deeda.
 - ✓ Si isku xiran ma u hadlaan su'aaladana ma weydiiyaan.
- Xirfada fikirka**
 - ✓ Fikradaha khiyaasta malada: miyee leeyihiin fikrado badan.
 - ✓ Miyee la imaanayaan fikrado xiiso leh oo dhibaatooyinka lagu xalinaayo.
- Dabiicada waxbarashada**
 - ✓ Si sahal ah u fahmaayo akhbaaraha; xasuusanaayo waxa uu bartay.
 - ✓ Rabo in oo ka shaqayo dhibaatooyin fara badan; oo aan dhameeyneeyshaqada sababtuna tahay ardayga oo xiisaynaayo mashruuca waqti badan galinaayo.
- Kicinta**
 - ✓ Xiisaaynaayo cutub maadada/mashruuca rabana waqti badan in oo ka shaqayo.
 - ✓ Ardayga oosan rabin ama u baahneen in la siiyo jaho ku dhameeyo shaqooyinka; jecelna iskii u soo saaro.
- Horumarinta dhaqanka bulshada**
 - ✓ Mid dareensan tixgalinta haboon iyo waxa quseeyo dadka kale.
 - ✓ Mid jecel wax saxan iyo/ama si xun ugu carooda qaladka.
 - ✓ Mid jecel is-dhagalka ardayda ka weyn ama dadka qaan-gaarka ah.
- Akhriska**
 - ✓ Akhriska klu fiican, akhrinaayo heer ka sareeyo fasalkiisa iyo/ama mid akhrinaayo da'da hore.
- Xirfada xisaabta**
 - ✓ Xiisaynaayo xisaabta, kana shaqaynaayoxisaabta fasal sare iyo/ama tusaayo xiisaynta nambarada da'da hore.

FOOMKA OGOLAASHAHA WAALIDKA/WAKIILADA

(SAXIIXA FOOMKA U MAGACAABIDA WAXAA LOOGA BAAHAN YAHAY KA HOR DHAMAAN IMTIXAANKA)

Magaca Awoowaha Ardayga	Magaca Koowaad	Magaca Dhexe	# ID Dugsiga Dadweynaha Seattle (looga baahan yahay)
Magaca Waalidka/Wakiilka (fadlan magaacada daabac)			Fasalka (08-09)
Adareeska Guriga			Dugsiga Hadda oo Dhigto School (08-09)
SEATTLE, WA 98_____			
Taleefoon Nambarka			Taariikhda Dhalashada
Adareeska E-maylka			Jinsiga
Haddii ubadkaada u baahan yahay deganaasho siin qaadida imtixaanka gaarka ah qorshaha 504. Fadlan calaamey halkaan soona dir qorshaha 504 adareeska kor ku yaal sida ugu dhaqsiyaha ah <input type="checkbox"/> Ka hor imtixaanka			Luqada Koowaad Guriga Loogu Hadlo
Ubadkaada weligiis malagu magacaabay ama malagu qiimeyey xaq u yeelashada barnaamijka Dalaacada Waxbarashada ee Dugsiga Dadweynaha Seattle? Haa __ Maye __ Haddii ay tahay "Haa," Sanadkee ayaa la qiimeeyey ubadkaada? _____			Jinsiga/Qoomiyada *

Waalidka/Wakiilada Dugsiga Dadweynaha Seattle:

Waxaan qirayaa ogolaashaha in ubadkayga ay imtixaanaa barnaamijka Dalaacada Waxbarashada Howlaha Ardayga. Imtixaankaas waxaa ka mid ah garashada aqoonta iyo awood tacliintiisa. Waxaa lay siiyey fasiraadda qaabka lagu garanaayo, doorashada barnaamijka, iyo habka diyaarinta rafcaanka (WAC 392-170-047).
Saxiixaada _____ Taariikhda _____

Waalidka/Wakiilada Dugsiyada Gaarka ah:

Waxaan qirayaa ogolaashaha in ubadkayga ay imtixaanaa barnaamijka Dalaacada Waxbarashada Howlaha Ardayga. Imtixaankaas waxaa ka mid ah garashada aqoonta iyo awood tacliintiisa. Waxaa lagu daray, Sii-deynta Akhbaaraha, waxaan u fasaxay Dugsiyada Dadweynaha muraajacad ku sameeyaan macluumaadka aan siiyey. Waxaa lay siiyey fasiraadda qaabka lagu garanaayo, doorashada barnaamijka, iyo habka diyarinta rafcaanka (WAC 392-170-047).

Saxiixaada _____ Taariikhda _____
(Qoyska hadda aanan ka diiwaangalin Dugsiga Dadweynaha Seattle, waa in oo ku soo lifaaq jeek lacag dhan \$90 qarashka imtixaanka).
Saxiixa waxaa loo baahan yahay WAC 392-170-047

*Fadlan fiiri labada bug Akhbaaraha Xirmada.